



Xeerarka CityArtist 2027 (Farshaxanka Magaalada)

Dulmarka Deeqaha

Deeqda CityArtist waxay taageertaa fannaaniinta iyo madxaflayaasha shaqsiyaadka ah ee ku nool Seattle ee ku hawlan cilmi-baarista, horumarinta, iyo soo bandhigista shaqo hal-abuur leh.

Codsiga 2027 wuxuu u furan yahay fannaaniinta iyo hawl-wadeenada dhaqanka (Maareeyayaasha bandhigyada) ka shaqeeya qoob-ka-ciyaarka (Dance), muusiga (Music), iyo masraxa (Theater), oo ay ku jirto qorista riwaayadaha (Playwriting). Fanaaniinta la abaalmariyo waxay u baahan doonaan inay bandhig dadweyne ku soo bandhigaan gudaha xadka magaalada Seattle. Waxaan taageernaa noocyo kala duwan oo muujin farshaxan iyo dhaqan ah oo ka tarjumaya kala duwanaanshaha magaalada.

Barnaamijka wuxuu u furan yahay kooxo qaabilsan qaybaha fanka sannado kale duwan:

- Sanadaha tiro-kisiga (2027): Qoob-ka-ciyaarka, Muusiga, iyo Masraxa (oo ay ku jirto qorista riwaayadaha)
- Sanadaha tiro-dhaban (2028): Suugaanta, Warbaahinta/Filimada (oo ay ku jirto qorista filimada – Screenwriting), iyo Farshaxanka Muuqaalka

Macluumaad iyo caawimaad ku saabsan codsiga, u-qalmitaanka, ama taageerada farsamada ee khadka, la xiriir Maareeyaha Mashruuca, Irene Gómez, lambarka 206-684-7310 ama ART_CityArtist@seattle.gov.

Waxaa noo jooga turjubaano kugula hadli kara luqadaada, kuwaaso ay ku jiraan Luqadda Calaamadaha Ameerika (muuqaal ahaan). Soo wac uun maareeyaha mashruuca oo u sheeg luqadda aad ku hadasho. Filo inaad sugto waqti yar inta ay raadinayaan turjubaan kusoo biira wicitaanka.

Codsiga (Arjiga)

[Ku Codso qaabka Khadka](#) iyadoo la adeegsanayo bogga deeqaha ee Magaalada Seattle.

Haddii aadan haysan kumbiyuutar ama internet, fadlan la xiriir shaqaalaha sida ugu dhaqsaha badan.

Taariikhda ugu danbaysa ee la codsan karo

Talaado, July 14, 2026, 5 PM Pacific

Fadlan u ogolow wakhti ku filan markaad buuxinayso codsigaaga (arjigaaga). Codsiyada la soo gudbiyo ka dib waqtiga kama dambaysta ah ee 5 galabnimo (Waqtiga Pacific) lama aqbali doono.

U-qalmitaanka

Waxaad xaq u leedahay deeqdan haddii aad buuxiso shuruudahan:

- Waxaad tahay shaqsi, farshaxan-abuure/hawl-wadeen dhaqan oo soo saara/bandhiga farshaxanka.
- Waxaad tahay degane Seattle ah ama waxaad leedahay studio/ goob shaqo oo joogto ah oo magacaaga ku qoran gudaha xadka magaalada Seattle halkaas oo aad ku hesho boostada. *Ma noqon karto P.O. Box.* Sanduuqa boostada (P.O. Box), meel ku-meel-gaar ah oo lagu tababarto, ama studio ku qoran magac ka duwan fannaan/madxafalaha la maalgelinayo *ma* buuxinayo shuruudda degganaanshaha. Haddii aadan hubin cinwaankaaga (ZIP code-yada qaar ee “Seattle” lagu magacaabo dhammaantood ma ku jiraan xadka magaalada), [geli ZIP code-kaaga khariidaddan magaalada](#) si aad u xaqiijiso. La xiriir maareeyaha mashruuca si aad u hesho caddeyn.
- Waxaad tahay ugu yaraan 18 sano jir taariikhda kama dambaysta ah ee codsiga
- Haddii aad tahay hormuudka fannaanka/maamulaha fanka ama koox dhaqameed/urur, waa inaad si cad u kala saartaa shaqada abaal-marintan iyo shaqada socota/xilliyeedka ee kooxdaada/ururka.

Xaq uma lihid deeqdan haddii:

- Waxaad degan tahay meel ka baxsan xadka magaalada Seattle mana ku haysid shaqo joogto ah / meel studio ah oo ku taal Seattle.
- Waxaad ku qoran tahay barnaamij waxbarasho oo shahaado bixiya oo la xiriira shaqadaada farshaxan ama xirfaddaada.
- Waxaad tahay qof hadda ka faa'iideysta abaalmarin ka mid ah barnaamijyadayada oo leh heshiis wali shaqeynaya.

Maalgelinta

Abaalmarinnadu waxay noqon doonan lacag keliya oo ah **\$8,000 dhammaan dadka qaadanaya.**

Aqoon isweydaarsiyada macluumaadka

Ku biir kulan macluumaad oo muuqaal ah si aad wax badan uga ogaato deeqdan iyo sida aad u soo gudbin lahayd codsi aad u xooggan. Waxaan si weyn ugu dhiirrigelinaynaa dadka markii ugu horreysay codsanaya inay ka qayb galaan. Kulamada dib-u-eegista qoraalka ee qof-qofka ah ayaa lagu heli karaa telefoonka:

Kulanka Macluumaadka ee Khadka ah 1

Arbaco, Juun 8, 4–6 galabnimo (Waqtiga Pacific)

[. Iska diiwaangeli kulanka Juun 8.](#)

Kulanka Macluumaadka ee Khadka ah 2

Isniin, June 15, 1-3 PM Pacific

[iska diiwaangeli kulanka June 15](#)

Kulan Dib-u-eegis Qoraal oo Telefoon ah – Ballan ayaa loo baahan yahay

Isniin, June 22, 1-6 PM Pacific

Isniin, June 29, 1-6 PM Pacific

Isniin, July 6, 1-6 PM Pacific

la xiriir maamulaha Mashruuca, Irene Gómez, 206-684-7310 ama ART_CityArtist@seattle.gov Si aad Balan u qabsato.

Saacadaha Furan ee Telefoonka – Ballan looma baahna

Talaado, June 9, 16, 23, 30

3-4 PM Pacific

La xiriir Maamulaha Mashruuca, Irene Gómez, 206-684-7310 ama ART_CityArtist@seattle.gov.